

Maxay hay'adda Canopy sameysaa?

Waxaan dib u cusbooneysiinnaa guryaha duugga ah ee ku yaal Leeds si loo hagaajiyo bay'adda xaafadda.

Waxaan dadka siinnaa fursado ay ku tadawucaan si ay gacan uga geystaan rinjiyeynta iyo qurxinta guryaha duugga ah, si ay u bartaan xirfado cusub, ula kulmaan dad qaybna uga noqdaan kooxda.

Waxaan abuurnaa guryo dib loo naash-naashay oo la iska bixin karo oo loogu talagalay qoysaska iyo dadka keligood ah ee aan haysan meel ay ku noolaadaan ama halista ugu jira iney gurilaawe noqdaan.

Canopy waxaa saldhig u ah goob soo dhoweyn oo adiga laguugu talagalay inaad isticmaasho maalintii, oo leh jiko, kombuyuutarro, telefoonno iyo miis kubbad cag.

Sidee ayey hay'adda Canopy u shaqaysaa?

Marka ugu horreysa hay'adda Canopy waxay meel ku habsataa guryaha madhan, ee birahoodu jajabeen ee noqday meel aan micno u lahayn dadka waddadaas deggan. Ka dibna waxaan sameynaa isku dubbaridyo annagoo kaashanayna milkiilaha, si aan guriga ula wareegno ka dibna waxaan diyaarinnaa koronto yaqaanno, tubiisteyaal iyo kuwa saqafka saara si ay u dhammeystiraan shaqooyinka waaweyn oo dhan.

Shaqaalaha Canopy, mutadawiciinta iyo kireysteyaasha, ayaa guriga isla aada iyagoo wata qalab waxayna sameeyaan nuuradaynta, saqaf saaridda, derbiyo waraaqo ku dhejinta iyo rinjiyeynta. Qofka ama qoyska guriga ku noolaanaya, waxay ka shaqeyn doonaan iyagoo qayb ka ah koox mutadawiciin ah si dib loogu cusbooneysiyo guriga ay u soo guuri doonaan waxayna dooranayaan rinjiga la marinayo gurigooda.

Waxaan horeyba uga soo shaqeynay labo xaafadood oo ku yaalla Leeds ilaa iyo 1998 (Hyde Park iyo Beeston), waxayna mar dhow mashruuc ka billaabi doonaa Harehills.

Yaa u tadawuca hay'adda Canopy?

Dadka deegaanka, dadka dhallinyarada ah, dadka waayeelka ah, ragga iyo dumarka iyo dad dhalashooyin kala duwan ayaa si mutadawacnimo ah ula shaqeeya Canopy. Waxaa dhammaanteen midba midka kale uu ka bartaa waxyaabo kala geddisan oo ay ka mid yihiin sida loo sameeyo qurxinta iyo shaqada dhisidda, sida loogu hadlo luqado kala duwan. Waxaan leennahay koox kubbad cag, waxaan maalmaha qaarkood aadnaa dibedda, oo waxaan soo cayaarnaa kubadda cagta ee miiska. Daawo filimka iyo qaar ka mid ah sawirradeenna <http://www.canopyhousingproject.org/gallery.html>

Maxay tahay sababta ay dadku iskood ugu shaqaynayaan?

Qaar badan oo ka mid ah mutadawiciinteenu waxay aadaan maaddooyin tababar ama waxa ay ugu danbeynta helaan shaqooyin, qaarkood waxa ay ku raaxaystaan khibrada ah iney qayb ka noqdaan koox saaxiibtinnimo leh halkaasoo qof kasta lagu soo dhoweynayo uuna dadka kale ku caawin karo kana shaqayn karo ka yeelidda guryaha xaafadda kuwo mar kale u ekaada kuwo cusub. Hay'adda Canopy waxay diyaarin kartaa turjumaan haddii aad u baahan tahay. Goobta kala shaqaynta

dadka mutadawiciinta ah waxay noqon kartaa fursad weyn oo lagu barto laguna dhaqangeliyo Ingiriiska marka laga maqan yahay fasalka.

Miyaad ku lug yeelan kartaa?

Waxaa laga yaabaa inaad daneyneyso inaad iskaa ku shaqeyso si aad gacan uga geysatid dib u cusbooneysiinta guryaha duugga ah ama waxaa laga yaabaa inaad taqaanno dad kale oo daneynaya. Waxaad baran kartay xirfad, waxaad caawino u heli kartay shaqo raadsasho, ama waxaad la kulmi kartay dad, naga soo wac 2946868.

Guri ma u baahan tahay? Haddii aad gurilaawe tahay aadna dooneysid inaad gurigaaga ku qurxisato caawino aad ka hesho koox mutadawiciin ah markaas soo wac hay'adda Canopy si aad wax uga ogaatid haddii ay jiraan wax guryo ah oo la heli karayo.

Haddii aad jeceshahay inaad noqoto mutadawac ama kireyste fadlan Canopy ka soo wac 0113 2946868